Gobolka Vestfold iyo Telemark

# Xeerka hab nidaameedka ardayda

**Xeer ku saabsan  hab-nidaameedka ardayda  dhigata dugsiyada sare**



# Innhold

**1. Ujeedada iyo meelaha uu khuseeyo** ... 3

§ 1-1. Ujeedada ... 3

§ 1-2 Meelaha uu khusayo ... 3

**2. Xuquuqda ardayda** ... 3

§ 2-1. Amni iyo goob waxbarsho oo fiican ... 3

§ 2-2. Xuquuqda ardayda ... 4

§ 2-3. Xuquuqda dimuqraadiyadeed ee ardayga ... 4

§ 2-4. Xuquuqda war-gelinta ... 5

**3. Waajibaadka ardayda** ... 5

§ 3-1. Nidaam ... 5

3-2. Hab dhaqanka ... 5

§ 3-3. Qiimaynta nidaamka iyo hab dhaqanka ... 6

§ 3-4. Maqnaashaha iyo imaatinka ... 6

**4. Maamulka kiis iyo ciqaabaha** ... 7

§ 4-1. Guud ahaan maamulka kiis ... 7

§ 4-2. Talaabooyinka caadiga ah ... 7

§ 4-3. Cunaqabatooyin gaar ah ... 8

§ 4-4. Hay'ada cabashada ... 8

**5. Qodobo kala duwan** ... 8

§ 5-1. Masuuliyada mag-dhoowga ... 8

§ 5-2. Fal denbiyeed ... 9

§ 5-3.Nidaamyo kale ee wax sharaxaya ... 9

§ 5-4. Hir-gelinta ... 9

# 1. Ujeedada iyo meelaha uu khuseeyo

### § 1-1. Ujeedada

Ujeedada hab nidaameedka gobolka Vestfold iyo Telemarka waa:

1. In laga caawiyo ardayda  in aqoontoodu kobocdo.Xirfadaha iyo dabeecadaha si ay u awoodaan si ay u maarayaan  noloshooda iyo in ay awoodaan in ay ka qayb qaataan shaqada  iyo iskaashiga bulshada dhexdeeda.
2. In la siiyo  qaab cad oo kor u qaadaya nidaamka iyo dhaqan wanaagsan iyo jawi wanaagsan oo waxbarasho,
3. In la siiyo warbixino ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka ardayga iyo ciqaabta uu helayo haduu jebiyo hab nidaameedka iskoolka.
4. In loo tilmaamo qiimaynta nidaamka iyo anshaxa, lagu soo rogo ganaax iyo in si isku mid ah loola dhaqmo ardayda.

### § 1-2 Meelaha uu khusayo

Xeerka hab-nidaameedku wuxuu khuseeyaa dhamaan dugsiyada sare ee dawliga ah ee Vestfold iyo Telemark.

Xeerku wuxuu khuseeyaa wakhtiga iskoolka,goobaha iskoolka,agagaarka iskoolka,dalxiisyada,safarada iskoolka ee isboorti ahaan ah iyo xafladaha iskoolku agaasimo.Sidoo kale ardayda shirkad u aada tababar xirfadeed.

Xeerku wuxuu kaloo  khuseeyaa  aflagaadada/cayda,xad-gudubka ka dhaca meelha ka baxsan goobaha iskoolka, wadada iskoolka oo aan ahayn wakhtiga iskoolka iyo aalada isgaarsiinta Sii fidintu waxay khusaysaa marka dhacdo ay xiriir la leedahay deegaanka iskoolka,dhacdadana ay keentay xaalad iskool ama saamayn raad reeb yeelata.

# 2. Xuquuqda ardayda

### § 2-1. Amni iyo goob waxbarsho oo fiican

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin amni iyo goob waxbarasho oo fiican

Iskoolku wuxuu si fir-fircoon uga shaqaynayaa  deegaan bulsho oo maskaxiyan u fiican,halkaas oo arday kastaa ka heli karo meel degan oo uu ku shaqayn karo, amni ah, bulsho uu ka mid yahay.

Iskoolku haba yaraatee uma dul-qaadanayo wax xad-gudub ah,aflagaado,cay,dhibaatayn iyo takoorid,waxuuna iskoolku leeyahay nidaam cad oo loo raaco.

## § 2-2. Xuquuqda ardayda

Ardaydu waxay xaq u leeyihiin

1. In loo la dhaqmo si edeb leh,ixtiraam iyo qaderin
2. Waxbarashada dugsiga sare marka loo fiiriyo sharciga waxbarista iyo xeerarka khusaya manhajka iyo go'aamada gobolka
3. Waxbaris ku haboon kartidiisa iyo shardiga
4. Ardaygu waa in uu ka qayb qaataa qorshaynta  iyo fulinta si loo helo jawi dugsi oo amaan ah oo wanaagsan
5. In uu yaqaano taargedka  waxbarashada  iyo waxa mudnaanta la siinayo marka la qiimaynayo
6. Uuna si firfiroon uga qayb qaato shaqadiisa iyo aqoontiisa iyo hur socodkiisa maado.
7. Lana siiyo ugu danbayn qiimayn maado, akhlaaq iyo hab dhaqankiisa. Lana siiyaa qiimayn nidaamsan  hadba marka wakhti la joogo,taas oo ah hadal iyo qoraalba.
8. Wada- hadal macalinku la yeesho ardayga ugu yaraan hal mar lixdii biloodba. Wada-hadalkana waa la diiwaan gelinayaa.
9. Talo siin lagama-maarmaan ah oo la xiriirta hadba baahida ardaygu qabo ee waxbarasho, xirfad iyo shaqo doorasho,iyo xaalada shakhsinimo iyo bulshanimo.
10. Iqoraal ahaan loogu wargelio hadii ay jiraan waxyaabahani:
    a. Haduu shaki ku jiro shaki in ardayga buundo la siiyo qiimaynta lixda bilood ama buunada cel-celiska
    b. Haduu ardaygu khatar u yahay in hoos loo dhigo buunda, habdhaqankiisa iyo akhlaaqdiiisa  lixbiloodlaha ah ama buudada cel-celiska.
11. In iskoolku la shaqayo waalidka ardayga

## § 2-3. Xuquuqda dimuqraadiyadeed ee ardayga

Iskoolku waa in uu u fududayaa ardayda dimuqraadiyada iyo in ardaydu ka qayb qaadato arimaha bulshada

1. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in ay ka qayb qaataan gudiyada iskoolka
2. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin in ay dhistaan golayaal arday. Golayaasha ardaydu waxay si joogta ah ula kulmayaan hogaanka iskoolka.
3. Iskoolku waa in uu u fududayaa goob shaqo oo fiican  iyo urur waxbarasho ahaan,ayna wakiil u yihiin ardayda, loona ogolaado in ay isticmaalaan  kanaalada macluumaadka iskoolka.
4. Golayaasha ardayda,gudiyada  bay'ada iskoolka,gudida iskoolka waxay soo bandhigayaan natiijada ukuurgelida tusaale ahaan ukuurgelida ardayda.
5. Ururada ardayda,siyaasada,ururada bani'aadnimo,ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in ay siyaasada qayb ka noqdaan, iyo in ay urur ahaan u shaqayn karaan wakhtiga

iskoolka iyo wakhtiga ka baxsan iskoolkaba, sidii ay ugu suurta geli lahaydna waa in ay kala hadlaan maamulka iskoolka.

### § 2-4. Xuquuqda war-gelinta

Hadii ay jirto hir-gelin la'aan xuquuqeed waa in ardaydu war-geliyaan iskoolka,wakiilada ama golayaasha ardayda.

## 3. Waajibaadka ardayda

### § 3-1. Nidaam

Ardaydu waa in ay yimaadan goor hore,muujiyaan,caadooyin shoqo oo wanaagsan iyo dadaaal shaqo oo wanaagsan.

Waa nidaam wanaagsan in:

1. Goor hore aad timaadid aadna si firfircoon uga qayb qaadato waxbarashada
2. Samay shaqada laguu diray inta aad kari kartid kuna samee waqtiga saxda ah
3. Iskookla/shrkada u soo sheeg sida ugu dhakhsiiyaha badan marka aadan imaanayn
4. Cadaynta maqnaanshaa ku keen waqtiga laguu qabtay,adoo u hogaansamaya jadwalka maqnaansha hada jira
5. Ha kuu nidaamsanaadeed qalabka waxbarashada eel agama maarmaamka ah iyo qalabka
6. Raac xeerka ilaalinta iyo badbaadada,isticmaalnadharka shaqada,qalabkja badbaadinta, ee u uku farayo manhajka waxbarshada ama lagugu amray in aad wadato.
7. Hagaaji marka aad isticmaasho ka dib iskoolka/shirkada iyo kafateeriyada
8. U hogansan cida iskoolka iska leh iyo tilmaamaha sharaxaya nidaamka ikoolka qodobka ka hadlaya ee §5-3

### 3-2. Hab dhaqanka

Ardaydu waa in ay ka qayb qataan oo abuuraan jawi iskool oo wanaagsan, midba midka kale ula dhaqmaa si isistixgelin leh oo ixtiraam leh

Waxaa hab dhaqan wanaagsan ah ian:

1. In aad gacan ka geystaan xasiloonda marka xiisada lagu jiro

2. In aad raacdo macalinka iyo sjaqaalaha kale timaamahooda
3. In aad iskoolka iyo hantidiis si taxdar leh ula dhaqantaan

Lama ogola:

4. In la isticmaalo luqad xun,cayama ku xadgudub jir ahaaneed qof kale,hadal ama internet,wax dishid ama argagixisid.
5. Isticmaalida moobilka elektaroonika iyo internettka marka waxbarashadu socoto hadii aan macalinu kuu ogolaan.
6. In aad sawir qaado ama isticmaasho,film iyo cod laga duubo ardayda kale,macalimiinta,shaqaqalaha kale ogolaanshaho la'aan
7. In la soo dejiyo ama la faafiyo jir ahaan ama elektaroonik ahaan:
   Filimada qaawan,cunsurinimada ama waxyaaba kale oo xad gudub ahba ama waxyaabaha kale ee sharci darada ah.kahmaarka lama ogola.
8. In aad isticmaashid ama xiriir la leedahay sigaarka ,tubaakada,sigaarka korantada ah,khamriga daroogada,ama wixii kale oo maan dooriya ahaba
9. In aad wadato shay khatar ah ama hub
10. In aad qishto ama isku teeri garayso in aa qishto imtixaanka ama waxyaabaha la soo xeraynyo in qof kale kaa caawiyo,ama aad qof kale caawiso ama isticmaashao aalada wax fududaysa oo aan la ogolayn.
11. In aad soo xerayso ama soo bandhigto qoraalo,laylisyo iyo wixii la mid ah oo aad ka dhigayso in aad adigu soo diyaarisay,laakiin qof kale soo diyaariyey,sidoo kale qoraalo aad ka soo qaadaty internetka.
12. In aad isticmaashid dhar kaa hor istaagaya wadahadalka ama lagugu aqoonsado xaalada waxbarshada.

Hadii shirkada (YFF) ay leedahay xeer la xiriira nidaam iyo hab dhaqan waa in loo hogaansamaa.

## § 3-3. Qiimaynta nidaamka iyo hab dhaqanka

Qiimaynta nidaamka iyo hab dhaqanka waxa kelya oo ay ku xiran tahay ilaa xadka uu ardaygu u dhaqmo si waafaqsan xeerka nidaamka. Iyo in la kala saaro qiimaynta aqoonta maadada ee ardayga.

## § 3-4. Maqnaashaha iyo imaatinka

Ardaydu waa in ay joogtaa wakhtiga waxbarashada hadii aanay balan kale la gelin iskoolka.

Dhamaan maqnaashaha waa la diiwaan gelinayaa haduu yahay maalmo ama saacado waxbarashadu markay bilaabato, kadib qofka yimaadana waxaa loo diiwaan gelinayaa in uu khalad sameeyey ama uu soo habsaamay.

Ardayku waa in uu u soo sheegaa iskoolka/shirkada (YFF) sida ugu dhakhsiiyaha badan oo suurta gal ah hadii uu xanuunsan yahay ama uu sabab kale u maqan yahay.Tani waxay kaloo kusaysaa hadii ardaygu ka tago waxbarshada .Hadii ardayga maqnaaashihiisii sii dheeraanayo waa in uu iskoolka u soo sheegaa.

Hadii kale maqnaanshaha waxaa loo maryaa sida waafaqsan xeerka 10% ee maqnaashaha iyo la socoshada maqnaashaha ee gobolka.

# 4. Maamulka kiis iyo ciqaabaha

## § 4-1. Guud ahaan maamulka kiis

Ardayda jebisa xeerka hab-nidaameedka cutubka 3 waxaa lagu qaadi karaa ciqaab.

Talaabooynku waxay ahaan doontaa mid macquul ah marka loo fiiriyo xeerka ay jebiyeen,inta ay le'eg tahay khatartiisu iyo in ay soo noq-noqday, kuwaas ayaa lagu qiimaynayaa cunaqabataynta lagu samaynayo ardayga.
Ardadu waxaa waajib ku ah in ay u hogaansantaa talaabooyinka iskoolku go'aamiyey.Hadii loo hogaansami waayana waxay keenysaa in la go'aamiyo talaabooyin cusub.

Ma aha sharci in koox si wadar ah loogu qaado talaabooyin, ciqaabeed wax hal arday keligii sameeyey.

## § 4-2. Talaabooyinka caadiga ah

Ciqaabta guuud waxaa lagu soo rogi karaa hadaad jebiso hab nidaameedka iskoola hal mar ama in ka badan jebinta xeerka. Ganaaaxa waa loo sheegayaa ardayga,waana la diiwaan geliyayaa iyada oo sababaysan.

Ardayda waxaa laga yaabaa in lagu guiso rogo hal ganaax ama in ka badan:

1. La hadlid af ah
2. Ogaysiis qoraal ah
3. In hoos loo dhigo buundada nidaamka ama hab dhaqanka
4. In laga qaado ardayga shay ama maandooriye
5. In uu ardaygu dib u hagaajiyo dhaawac uu gaystey tusaale ahaan nadiifiyo,hagaajiyo ama ama meel wax ka qaado

6. In lagu soo rogo in uu joogo kulamada iskoolka ka hor iskoolka iyo kadiba wakhtiga caadiga ah ee iskoolkatusaale ahaan yimaado kulanka golaha khilaadka
7. In laga xadido in uu isticmaalo qalab/garaashka/qol gaar ah
8. In laga bixiyo fasalka/kooxda, inta ka dhiman tababarashada,loo diido laba xiisadood, kadib marka macalinku go'aamiyo.

### § 4-3. Cunaqabatooyin gaar ah

Cunaqabataymaha gaarka ahi waa goaan,kaas oo la dul dhigayo marka ay yimaadaan dhacdooyin khatar ah ama jebin hab nidaameedka ah oo soo noq-noqday.Tusaale ahan waxay noqon karaan gacan ka hadal(dil), xadgudub,haysashada hubka ama maandooriyaha,qish ama xatooyo.

Intaan cunaqabatay gaar ah la qiimayn lana goaamin,waxaa ardyaga la siinayaa jaanis uu ku hadlo.Maamuluhu waa in uu ardayga ka caawiyaa in uu soo kaxaysan karo qof wada hadalkan.ardayga ka yar 18 sano mar walba waalidkiis waa lala socod siinaya.

Cunaqabataynta  gaarka ahi  waxay noqonayaa qoraal ahaan,lana sababayey waxaana ku qoran in ardaygu uu cabasho/ambiil ka qaadan karo. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in la hago wixii ku saabsan xuquuqdiisa isaga oo kiiska qayb ka ah iyo sida uu cabashadiisa u soo gudbisan karo.

Inta aan go'aanka la gaarin ku saabsan in ardayga la eryo,waxaa la fiirinayaa in la samayn karo dhaq-dhaqaaq caawimo iyo cunaqabatayn fudud.

Ardayga waxaa lagu soo rogi karaa mid ama dhawr ka mid ah cunaqabatayno:

1. In hoos loo dhigo buundada  nidaamka ama hab dhaqanka
2. In laga eryo iskoolka/shirkada (TFF)  inta ka dhimana iskoolka maalintaas kadib marka uu go'aamiyo maamuluhu
3. In laga eryo maalin iskoolka ilaa iyo shan maalmood  marka maamuluhu go'aamiyo
4. In iskoolka laga eryo inta ka hartay sanad dugsiyeedka kadib marka ay go'aamiyaan gobolka iyo gudoomiyaha waxbarashada iyo caafimaadka ee gobolku.

### § 4-4. Hay'ada cabashada

Maamulka gobolka baa iska leh maamulkacabashada  marka la gaaro goaan ciqaabeed jf. § 4-3.

## 5. Qodobo kala duwan

### § 5-1. Masuuliyada mag-dhoowga

Ardaygu wuxuu masuul ka noqon karaa haduu dhaawac u geysto iskoolka  ama hantida  dad kale leeyahay.

## § 5-2. Fal denbiyeed

Fal denbiyeedka soo hoos gelaya xeerka hab-nidaameedka qodobka § 1-2, waxaa lagu dacwaynayaa booliska.

## § 5-3.Nidaamyo kale ee wax sharaxaya

Cida iska leh iskoolka waxay u samaysan karaan nidaam u gaar ah oo la xiriira:

- Xeerka kumbiyuutarl (IKT)
- Xeerka imtixaanaadka
- Dalxiis/safarada iskoolka

Qaar kamid ah dugsiyada sare waxay  ka shaqayn karaan oo samaysan karaan nidaam u gaar ah sida:

- Maqaaxida
- Meelaha baabuurta la dhigto
- Isticmaalka qalabka iskoolka/garaashka/qol khaas ah
- Caafimaadka,deegaanka,badbaadinta
- Dalxiiska/safarada iskoolka

## § 5-4. Hir-gelinta

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa laga bilaabo 01.08.2019

# Ogaysiin!

Marka hab-nedaameedka isaga oo elektaroonik ah la geliyo bogga internetaka ee gobolka,waxaa dhinac yaala  dukumintiyo aas-aasi ah.Hadii aad  isticmaashaan hadba markii wakhti la joogo waxaa la cusboonaysiinayaa warbixinaha ku qoran.

Iskool kastaa waa in isagu samaystaa sharaxaad nidaameed jf. §5-3 ay ardaydu  oo ay ardaydu heli karaan.

**Iskool kastaaba waxaa waajib ku ah dukumantiyo guud oo aas-aasi ah  ardayguna heli karo:**

- Shariciga dugsiga hoose iyo dugsiga sare  (sharciga waxbarashada) iyo xeerka waxbarashada
- Sharciga ku saabsan sida loo maamulo kiisaska maamulka (sharciga maamulka)
- Habka loo maareeyo cabashooyinka uu ardaygu ka cabanayo shaqaalaha dugsiyada sare ee Vestfold iyo Telemark
- Manhajka kor u aqaadiada aqoonta
- Xeerka kumbiyuutarka (IKT) ee shaqaalaha iyo ardayda dugsiyada saree e Vetfold iyo Telemark
- Xeerka imtixaanaadka dugsiyada saree e Vestfold iyo Telemark
- Nidaamaka maqnaashaha ee dugsiyada sare ee Vestfold iyo Telemark

Liisku ma aha mid dhamaystiran.

**Hab nidaameed sharaxaya oo waajib ku ah in iskoolku u diyaariyo ardayda:**

Hab nidaamieed iskoolku ka shaqayey oo ay weheliyaan hab nidaameedku jf. §5-3.


Gobolka Vestfold iyo  Telemark vtfk.no

Ciwaanka boostada

Postboks 2844
3702 Skien

Ciwaanka booqashada
Torggata 18, Skien
Svend Foynsgate 9, Tønsberg

Xarunta talefoonka
35 91 70 00

post@vtfk.no